

Xeer-Sharci lamba. 7 ee 29 Disember 1966

Kordhinta canshuurta dekedda ee kenista shidaalka iyo saliida ceerinka iyo haraagiisa

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 62 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay sharciga lamba. 24 ee 21 Disember oo siinaya awooda in la soo saaro xeerar ilaa 31 Disember oo xeerin doona habka loo dabooli lahaa misaaniyada hor dhaca ee Dowladda;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Wasiirka Maaliyadda;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Laga bilaabo taarikhda uu hirgalo xeer-sharcigaan, waxaa la kordhiyey canshuurta laga qaado alaaba ku tixan codka 55 sida soo socota:

55: Saliida Macdanta ah

- a) Shidaalka ceerinka ah iyo haraaga Sh.So. 0,50 litarkii;
- b) Shidaalka banzinka Sh.So 0,60 litarkii.

Qod. 2

Qaybta ugu badan ee dhan Sh.So. 4.000.000 sida lagu qoray cutubka, Madaxa ee Daqliga Misaaniyadda Hordhaca ee 1967.

Qod. 3

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco.

Dekreetadan-sharci waxaa lagu keydin doonaa Keyda Rasmiga ee Shuurucda iyo Xeerarka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la faraaya cid kasto in loo hoggansado sharciga loona hoggamiyo cidka.

Muqdisho, 29 Disember 1966.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Maaliyada

Dr. Ali Omar Scego